

1

Akhri bayaannada ku jira lifaaqan ee ku saabsan tartannada aad ka codeynayso.



2

Warqaddaada codbixinta, buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga adigoo isticmaalaaya qalin midab kasta ah.



3

Saxiix bakhshaddaada. Saxiixaagu waa inuu u dhigmo saxiixa aan ku hayno diiwaankaaga diiwaan gelinta codbixiyaha si warqaddaada codbixinta loo tiriyo.



4

Warqaddaada codbixinta wakhti hore soo celi. Haddii aad isticmaalayso sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama boostada, wakhti hore codeey!



5

Ka raad-raac warqaddaada codbixinta halka [kce.wiki/TrackMyBallot](https://www.kingcounty.gov/elections/obmp). Waa sida ugu dhaqsaha badan ee aad ku ogaan karto in warqaddaada codbixinta la tiriya, codkaagana la maqlay.



Sida loo

codeeyo!


Doorashada Gaarka ee Febraayo 2025

Degmada King Buug-yaraha Codbixiyeyaasha Deegaanka ee Rasmiga ah

sida ay codsadeen Degmada Dugsiga Issaquah Lr. 411

Saxiix si aad u hesho digniimaha warqadda codbixinta!

Hel qoraallo taleefan ama iimeelyo ah marka warqaddaada codbixinta la sii habeynaayo oo la tiriyo. Iska qor halka [kce.wiki/TrackMyBallot](https://www.kce.wiki/TrackMyBallot).



Is diiwaan geli si aad u codeyso



Oonleenka: Booqo [VoteWA.gov](https://www.vote.wa.gov) si aad oonleenka iskaga diiwaan geliso oo aad u codeyso. Wakhtiga kama dambeysta ah ee is diiwaan gelinta oonleenka ee Doorashada Gaarka ah ee Febraayo waa Febraayo 3.



Boostada: Ka soo degso oo daabaco foomka diiwaan gelinta halka [kce.wiki/VoterReg](https://www.kce.wiki/VoterReg) oo boostada ugu dir Doorashooyinka Degmada King: 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057. Waa in la helaa ugu dambeyn Febraayo 3.



Shakhsi ahaan: Waxaad shakhsi ahaan iskaga diiwaan gelin kartaa halka xarunta guud ee Doorashooyinka Degmada King ilaa iyo Febraayo 11, Maalinta Doorashada. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan saacadaha iyo adeegyada waxaad ka heli kartaa halka [kingcounty.gov/elections](https://www.kingcounty.gov/elections).

Nala soo xiriir si aad u hesho buug-yarahan oo qaab kale ah.

Contact us to receive your voting materials in Chinese, Korean, Russian, Somali, Spanish or Vietnamese.

如需獲取您的中文投票資訊，請與我們聯絡。

한국어로 투표 자료를 받으시려면 저희에게 연락하세요.

Свяжитесь с нами, чтобы получать материалы для голосования на русском.


Nala soo xiriir si aad u hesho agabkaaga codeynta oo ku qoran Af-Soomaali.

Comuníquese con nosotros para recibir sus materiales de votación en español.

Xin vui lòng liên lạc với Sở Bầu cử Quận King để nhận tài liệu bầu cử bằng tiếng Việt.



Barro wax dheeraad ah oo ku saabsan sanduuqyada lagu rido, xarumaha codbixinta, iyo in ka badan!




Waxaan halkaan u joogaa in aan caawino!

Shaqaalaha doorashooyinka ayaa kaa caawini kara inaad is diiwaan geliso oo aad hesho warqad codbixin cusub ilaa iyo Maalinta Doorashada. Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah oo ma rabtaa inaad si gaar ah u calaamadayso warqaddaada codbixinta? Ka hel warqaddaada codbixinta oonleenka barta [kingcounty.gov/elections/obmp](https://www.kingcounty.gov/elections/obmp) si aad uga faa'iidayso Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka.

Warqaddaada codbixinta waxaa ku duuban macluumaad muhiim ah oo ku saabsan sida loo soo celiyo warqaddaada codbixinta, helitaanka caawinaadda, iyo wax dheeraad ah. Iska xaqiiji inaad lifaaqa warqaddaada codbixinta ka eegto:

- Shanta sanduuq ee lagu rido warqadda codbixinta ee kuugu dhow
- Halkee laga heli karaa caawinaad shakhsi ahaanneed
- Sida loo daabaco warqaddaada codbixinta haddii taada lunto ama burburto.



Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah?

Haddii warqaddaada codbixinta ay dhunto ama xumaato, waxaad daabacan kartaa mid beddelaad ah adigoo isticmaalaaya Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka (Online Ballot Marking Program, OBMP). Istimalka OBMP, waxaad ku heli kartaa oo aad daabacan kartaa warqad codbixin beddelaad ah adigoo jooga guriga, maktabadda, ama meel walba oo ku habboon.

OBMP waxaa loogu talagalay inuu u oggolaado codbixiyeyaasha naafada ah, oo ay ku jiraan kuwa indhooleyaasha ah ama uu aragoodu hooseeyo, inay warqaddooda codbixinta si qarsoodi ah u calaamadayaan. Waxaa heli kara dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan.



Sida loo isticmaalo Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka

- Tag halka [kingcounty.gov/elections/obmp](https://www.kingcounty.gov/elections/obmp).
- Macluumaadkaaga geli foomka.
- Ku calaamadee dookhyadaada warqadda codbixinta oonleenka oo ka dibna daabac warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay.
- Hubi in warqaddaada codbixinta si sax ah aad u calaamadaysay.
- Ku soo celi warqaddaada codbixinta sida caadiga ah, halka sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama adoo soo marsiinaaya boostada.

AMA

- Daabac warqaddaada codbixinta oo ka dibna gacanta ku calaamadee.

Lacagta boostada looma baahna haddii aad isticmaasho xaashida lifaaqa bakhshadda ee la socota marka aad daabacayso warqaddaada codbixinta.



Haddii aad u baahan tahay caawinaad dheeraad ah ama hab kale oo aad u dhiibato warqaddaada codbixinta, fadlan la xiriir xafiiskeena halka 206-296-VOTE (8683).



Yaa deeq ku bixiya ololeyaasha?

Eeg ku-deeqeyaasha musharaxiinta iyo cabbirrada sharciga:

Guddiga Kashifaadda Dadweynaha

www.pdc.wa.gov | Wicitaanka Lacag La'aanta 1-877-601-2828

206-296-VOTE (8683)

elections@kingcounty.gov
[kingcounty.gov/elections](https://www.kingcounty.gov/elections)

Baraheena Bulshada

[@kcelections](https://www.kcelections.org)


Soo Jeedinta Lr. 1

Curaarta Waajibaadka Guud - \$231,600,000

Guddiga Agaasimeyaasha Degmada Dugsiga Issaquah Lr. 411 ayaa hirgeliyay Qaraarka Lr. 1233 oo ansixinaaya soo jeedinta curaarta. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay samayso kor-u-qaadidda badqabka iyo amniga, wax ku kordhin qaar ah iyo dib-u-qaabaynta Dugsiga Sare ee Liberty, dhisidda iyo qalabaynta dugsi sare oo dhammaystiran iyo samaynta horumarinnada raasumaal kale; inay bixiso \$231,600,000 oo ah curaarta waajibaadka guud oo ku buuxsamaya ugu badnaan muddo 20 sanno gudahood, iyo in la ururiyo canshuuraha hantida ee xad dhaafka ah sannad walba si dib loogu bixiyo curaarta, sida ku cad Qaraarka Lr. 1233.

Ma tahay in soo jeedintaan la:

Ansixiyo

Diido

Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.



Waxaad u codeynaysaa inaad **Ansixiso ama Diido** Soo Jeedinta Lr.1

Shuruudaha ansixinta: 60% codeyn haa ah iyo soo bixitaanka ugu yaraan 40% ee codbixiyeyaashii dhiibtay warqadaha codbixinta doorashadii guud ee ugu dambaysay (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(b))

Bayaanka sharaxaadda

Guddiga Agaasimeyaasha Degmada Dugsiga Issaquah Lr. 411 ayaa hirgeliyay Qaraarka Lr. 1233 oo ansixinaaya soo jeedinta curaarta. Tani waxay Degmada u oggolaanaysaa inay samayso cusboonaysiinta lagama maarmaanka ah ee amniga gudaha iyo dibadda, beddelidda, iyo hagaajinnada; in wax ku dar iyo dib u habeyn lagu sameeyo Dugsiga Sare ee Liberty si loo oggolaado balaarinta boosaska hal abuurnimada iyo u diyaar garoowga shaqada; in la dhiso oo la qalabeeyo dugsi sare oo dhammaystiran; iyo in la bixiyo maaraynta mashruuca hagaajinnadii hore, in la bixiyo \$231,600,000 ee curaarta waajibaadka guud oo ku buuxsamaya ugu badnaan 20 sanno gudahood, iyo in la ururiyo canshuuraha hantida ee xad dhaafka ah sannad walba si dib loogu bixiyo curaarta, sida ku cad Qaraarka Lr. 1233.

Ka dhaafitaanka canshuuraha ayaa laga yaabaa inay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha. Si aad u ogaato haddii aad u qalanto, wac Qiimeeyaha Degmada King (206) 296-7300.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:

Martin Turney
Madaxa Maaliyadda iyo Hawlgallada
(425) 837-7011
turneym@issaquah.wednet.edu

Bayaanka lagu taageerayo

Kevin Nichols, Dana Rundle, Peter O'Donoghue

Dugsiyada sare ee Degmada Dugsiga Issaquah ayaa si daran aad ugu buuxdhaafay, ayagoo dalbanaaya waxqabad degdeg ah. Curaartaan ayaa xallinaysa buuxdhaafka. Waa 1/3 qiimihii curaartii Nofeembar ee ugu dambaysay *mana kordhin doonto canshuurtaada maadaama ay beddeshay curaarta iyo canshuuraha wakhtigooda dhammaaday.*

Bulshadeenu waxay dhiseen nidaam dugsi oo aad loo ixtiraamo. Dugsiyadeenu waxay horseedaan kobaca dhaqaalaha waxayna saameeyaan qiimeyaasha guryaha. Maalgelinta Joogtada ah ee dugsiyadeena ayaa faa'iido u leh dhammaan canshuur bixiyeyaasha.

Buuxdhaafka maaha oo keliya dhib; waxay tanaasul u tahay waxbarashada, caafimaadka maskaxda, iyo badqabka. Fasallada dugsi sare ayaa noqday kuwo dhinacyada ka dilaacaya, shaybaarka iyo goobaha xirfadda ayaa xaddidan iyo meelaha la wadaago oo ciriiri ah. Buuxdhaafka ayaa xaddida ka qaybgalka iyo isdhexgalka ardayga/macallinka ee muhiimka ah. Iyada oo la filayo in diiwaan gelinta dugsi sare ay koraan 20% 15-ka sanno ee soo socda, waxaa jira degdeg ah in hadda wax looga qabto.

Curaartan ayaa noqon doonta: 1) in la dhiso dugsi sare oo cusub si wax looga qabto ciriiriga; 2) balaarinta Dugsiga Sare ee Liberty oo leh 20,000 oo iskuweer fiit oo fasal iyo booska tababarka shaqada ah; 3) balaarinta waddada 228th si loo hagaajiyo socodka gaadiidka ee dugsi sare ee cusub; 4) hagaajinta amniga degmada oo dhan iyadoo la adeegsanayo hababka dab-damiska, kaamirooyin iyo gelitaanka dhismaha oo sugan. Oggolaanshaha waa la ansixiyay oona diyaar u ah in la dhiso aasaaska Abriil 27th. *Guddi bulsho oo cusub ee kormeer oo leh khibradaha maamulka maaliyadda, dhismaha, iyo mashaariicda ayaa xaqiijin doona isla xisaabtanka.* Ku Codee Haa!

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Dugsi sare oo cusub waa lama huraan. Saddexda dugsi sare ee ISD waxa loo dhisay 4,921 arday laakiin hadda wuxuu u adeegaa 5,735. Diiwaan gelinta ayaa la saadaalinayaa inay kor ugu kacdo 6,903 15 sanno gudahood.

Beddelaadda ayaa ah hoos u dhaca ku imaanaya waxbarashada carruurteena. U wareejinta fasallada 9-aad dugsi dhexe ama "laba-laabitaanka" qaadka dhismaha oo leh maalmo dugsi oo ah subax iyo galab/habeen oo kala duwan ayaa ah wax muddo kooban xallinaaya buuxdhaafka. Guddiga cusub ee kormeerka ayaa xaqiijin doona daah furnaanta iyo isla xisaabtanka. Ku Codee Haa!

Bayaanka looga soo horjeedo

Daniel Sreebny
ccare98027.com

Bishii Nofeembar, codbixiyeyaashu waxay "maya" ku yiraahdeen curaar dugsi oo ah \$642 milyan. Curaartaan cusub waxay u muuqataa mid kasii yar haddana si fudud ayay u faafinaysa isla nuxurka iyo kharashka mustaqbalka joogtada ah ee curaarta iyo canshuuraha, laga bilaabo Abriil 2025. *Codbixiyeyaashu mar hore ayay yiraahdeen maya waxayna rabaan xalal wanaagsan.*

Dugsiga sare ee cusub waa mid aan loo baahnayn. ISD waxay qiratay inay jiraan habab wax ku ool ah oo aan qaali ahayn si wax looga qabto buuxdhaafka ku meel gaarka ah ee aanay ku jirin mas'uuliyad darro maaliyadeed oo ah \$292,700,000 (oo lagu daro dulsaar) dugsi sare. Maalgelinta baahiyaha ardayda iyo macallimiinta waa lama huraan, laakiin habka uu Guddiga hadda wax u wado ayaa ah marin habaabin.

Guddiga ISD waxay lumiyeen kalsoonideenii waxayna yihiin kuwo dareen la'aan ka ah kharashka ay ku kacayso qoysaska. Waxay leeyihiin diiwaan mashruuc raasumaal xad dhaaffa, ballanno jabay, iyo lacagaha la marin habaabiyay, iyada oo aan dammaanad laga haysan in tani aysan mar kale dhici doonin. Ha ku kadsomin dib u hagaajinta. Kalsoonida dib ayaa loo dhisi karaa - iyadoo dib looga fakarayo cabbirka dugsi sare iyo in la hubiyo in lacaguhu yihiin kuwo ujeeddo leh oo si wanaagsan loo isticmaalo.

Guddiga ISD waxay sheeganayaan inay anaga inoo shaqeeyaan, haddana way iska indho-tiraan rabitaanka dadka. Codkaaga ee "maya" wuxuu soo diri doonaa fariin cad oo ay tahay inay dhegaystaan, halkii ay si fudud u sii wadan lahaayeen dhaqamadooda qayrul masuulnimo. Si adag u codso daacadnimo, hufnaan, iyo isla xisaabtan. *Fadlan ku Codee Maya!*

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Nidaamka dugsi wuxuu leeyahay awood uu wax kaga qabto shuruudaha diiwaan gelinta ee hadda iyo kuwa mustaqbalka. Bal qiyaas isticmaalka lacagtaan si loogu adeego baahiyaha dhabta ah ee ardayda iyo macallimiinta - dhammaanteen waan tani taageersanahay.

Bayaanka ISD ayaa waxa loo qoray in marin habaabiyada dadweynaha loona qariyo xaqiiqada. Curaarta ayaa si xariifnimo leh loo cabbiray si canshuurta loogu hayo inay noqoto mid siman oo aan kor u kicin codeyntaan, laakiin waxaan arki doonaa canshuuro aad u sareeya mustaqbalka. Guddigu ma xallinayo mashaakiillada ama ma ixtiraamayo bulshada.